

OGAYSIIS SHARCI

Tallaalka Loo Baahan Yahay Galitaanka Dugsiyada Wisconsin

LEGAL NOTICE: REQUIRED IMMUNIZATIONS (SHOTS) FOR ADMISSION TO WISCONSIN SCHOOLS

Ku Socda Waalidka, Wakiilka ama Masuulka Sharciga ah _____ Fasalka _____

Sharciga Tallaalka Ardaygu (Student Immunization Law) wuxuu dhigayaa in dhammaan ardayda ilaa fasalka 12aad ay buuxiyaan tirada tallaalka ee ugu yar ee loo baahan yahay kahor galista dugsiga. Shuruudahan waxa loo dhaafi karaa kaliya haddii ay jiraan sababo caafimaad, diin, ama rumaysnaan xoog badan oo shakhsi ah. Marka la eego diiwaanadayada, ilmahaagu kuma taagna sida la rabay sababtoo ah diiwaan tallaalka kama yaalo dugsiga ama tallaalka ayaa loo baahan yahay (fiiri sababta ku taagnaan la'aanta ee hoos ku calaamadsan) mana jiro wax ka dhaafis ah oo fayl garaysan. Si uu ugu taagnaado sharciga, fadlan sheeg bisha, maalinta, iyo sannadka ilmahaagu helay tallaalka la rabo ee ku yaala Diiwaanka Tallaalka Ardayga ee ku lifaaqan, ama dooro mid kamid ah ikhtiyaarrada ka dhaafista inta ka horaysa [enter 30th school day] kuna soo celi foomka dugsiga ilmahaaga. Haddii aad sidaas yeeli waydo waxay keeni kartaa ka saaris dugsi, tallaabo maxkamadeed, iyo/ama ciqaab ah inuu dhumiyo mudnaan. Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo kusaabsan ogaysiiskan ama sida loo helo tallaalka loo baahan yahay, fadlan la xidhiidh dugsiga ilmahaaga.

Sababta ku taagnaan la'aanta:

Ma Jiro Diiwaan

Marka la eego diiwaanadayada dugsiga, tallaalka soo socda ayaa loo baahan yahay:

<u>Gawracatada/DT/Td</u>	<u>Dabaysha</u>	<u>MMR¹</u>	<u>Cagaarshow B¹</u>	<u>Faraseela^{1,2}</u>	<u>Tdap³</u>
<input type="checkbox"/> Marqaadashada 1 ^{aad}	<input type="checkbox"/> Marqaadashada 1 ^{aad}	<input type="checkbox"/> Marqaadashada 1 ^{aad}	<input type="checkbox"/> Marqaadashada 1 ^{aad}	<input type="checkbox"/> Marqaadashada 1 ^{aad}	<input type="checkbox"/> Marqaadashada 1 ^{aad}
<input type="checkbox"/> Marqaadashada 2 ^{aad}	<input type="checkbox"/> Marqaadashada 2 ^{aad}	<input type="checkbox"/> Marqaadashada 2 ^{aad}	<input type="checkbox"/> Marqaadashada 2 ^{aad}	<input type="checkbox"/> Marqaadashada 2 ^{aad}	
<input type="checkbox"/> Marqaadashada 3 ^{aad}	<input type="checkbox"/> Marqaadashada 3 ^{aad}		<input type="checkbox"/> Marqaadashada 3 ^{aad}		
<input type="checkbox"/> Marqaadashada 4 ^{aad}	<input type="checkbox"/> Marqaadashada 4 ^{aad}				
<input type="checkbox"/> Marqaadashada 5 ^{aad}					

¹ Haddii ilmahaagu uu leeyahay natiijooyin shaybaadh oo caddaynaya in ilmahaagu uu ka tallaalan yahay jadeecada iyo dhago-fidiyaha (qaamaqashiir) iyo rubbeelada, ama leeyahay natiijooyin shaybaadh oo caddaynaya in ilmahaagu ka tallaalan yahay cagaarshow B, uu leeyahay natiijooyin shaybaadh oo caddaynaya in ilmahaagu uu ka tallaalan yahay bus-buska, sii natiijooyinka shaybaadh dugsiga. Haddii natiijooyinka shaybaadh yihiin qaar la aqbali karo, markaa ilmahaagu uma baahna in laga tallaalo cudurrada uu hore uga tallaalnaa.

² Haddii ilmahaagu uu horey ugu dhacay hablobaas, tallaalka busbuska looma baahna. Ku jawaab "haa" su'aasha cudurka hablobaasta ee Diiwaanka Tallaalka Ardayga ee ku lifaaqan oo gali taariikhda cudurka, haddii aad garanayso.

³ Haddii ilmahaagu helay marqaadasho tallaalka teenadu kujirto, sida Td, shan sano gudahood ee galista fasalka Tdap loo baahan yahay, ilmahaagu waa ku taagan yahay oo marqaadasho Tdap ahna looma baahna.

Iskaashigaaga soo dhaw waan kaaga mahadcelinnaynaa.

Dugsiga

Taleefanka

Sarkaalka Dugsiga (Mansabka)

Taariikhda la Diray

enc: Diiwaanka Tallaalka Ardayga